



# Coronavirus (COVID-19) macluumaadka iyo dugsiyada – macluumaadka waalidiinta iyo ardeyda

Dhammaan dawladaha Australia – ta dhexe, gobolka iyo territory ga- waxay aqoonsan yihiin muhimada waxbarashada waxaana ka go’an taageerida waxbarashada ardeyda inta lagu jiro faafitaanka COVID-19.

Hay’adaha aan dawliga ahayn iyo dawladaha territory ga iyo gobolka ayaa masuul ka ah maareynta iyo sameynta go’aamo hawlgalka ee dugsiyadooda. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida dugsiyada goobaha kuu dhow ay uga jawaabayaan COVID-19 fadlan la xiriir dugsiyaaga marka ugu horeysa raacna tallada dawlada gobolkaaga ama territory ga. Xiriirada websute -dada waxbarashada dawlada gobolka iyo territory ga waa kuwan hoose:

[Australian Capital Territory](#)  
[New South Wales](#)  
[Northern Territory](#)  
[Queensland](#)  
[South Australia](#)  
[Tasmania](#)  
[Victoria](#)  
[Western Australia](#)

Dawlada gobolka iyo territory ga waxay isku raaceen in go’aamada ku saabsan sidii looga jawaabi lahaa COVID-19 ee dugsiyadu waa inay sii socotaa in la wargeliyo khubarada, saraakiisha, talada waxbarashada iyo caafimaadka dadweynaha ee gobolka oo dhan iyo qarankaba.

## Yaraynta halista suurtagalka ah faafinta COVID-19 ee dugsiyada

Tariikhdu markey aheyd 24kii Abriil 2020, Guddiga Madaxa Badbaadada Caafimaadka ee Australia (AHPPC) waxay siidaayeen talo caafimaad ([health advice](#)) laxidhiidhta yareynta halista suurtagalka ah ee gudbinta COVID-19 ee iskuulada. Tilmaantaan iyo talooyinkan waxqabadka ah waxaa loo diyaariyey hoggaamiyeyaasha dugsiyada ee la hawl gala carruurta, waalidiinta, macallimiinta iyo shaqaalaha taageerada si loo gaadhsiiyo halista ku fidid karo karonfayras “Coronavirus” (COVID-19) iskuulada halka ugu hooseysa inta lagu guda jiro aafada COVID-19.

Marka la soo koobo waxyaabaha la tixgeliyo waxaa ka mid ah:

- Loogu talagalay waalidiinta: haddii ilmahaagu xanuunsan yahey, ma aha inuu tago dugsiyada. Waa inaad ku ilaalisaa guriga iyo dadka kale. Xusuusnow inaad ilaalisaa kala foogaanshaha-bulshada ee waalidiinta kale iyo macallimiinta marka aad dugsiyada dhiganeysid, ama aad ka qaadeysid iskuulka carruurtaada.
- Loogu talagalay carruurta: u sheeg waalidkaaga, mas'uulkaaga ama macallinkaaga haddii aad xannuun dareento.
- Macallimiinta: ha iman shaqada haddii aad xanuunsan tahay ama aad tahay qof ku sifeysan nugulaan.

- Dhammaan dadka waaweyn: khatarta ugu weyn ee gudbinta ee jawiga dugsiga waa ta udhaxeysa dadka waaweyn. Waa ta ugu muhiimsan in macallimiinta iyo waalidiinta si isku mid ah ay u ilaashadaan kala fogaashaha-bulshadeed ee u dhexeeya naftooda iyo midba midka kale ee dugsiga.

## **Nadaafadda**

Ardayda waxaa la xasuusinayaa inay:

- Ku meydhid gacmahaaga had iyo jeer saabuun iyo biyo oo ku jiraan cunnada ka hor iyo ka dib iyo ka dib suuliga marka aad tagtid.
- Isticmaal gacmo-nadiifiye jeemiska deli ah.
- Ku dabool qufacaagaaga iyo hindhisadaada cududaada ama tiishuu (maya gacmaha).
- Ku tuur tiishuuga aad isticmaashay biinka isla markiiba gacmahaaga meydh.
- Isku day inaad taaban afkaaga ama wejigaaga.
- Ha qabsan gacmaha, ama ha gacan qaadin dadka kale.
- Isku day inaad haysatid meel ka sii badan intii caadiga ahayd ee u dhaxaysay naftaada iyo dadka kale.
- Ka fogow kuyuuga.
- La xidhiidh dadka kale haddii aad walwal dareemayso.

## **Soogelitaanka jaamacadaha iyo nidaamka dugsiga sare fasalada dambe**

7 Abriil 2020, wasiirada Waxbarashada gobolada iyo territory ga waxay isku raaceen in ardeyda dugsiga sare (ardeyda fasalka 12) waxay awoodi doonaan inay helaan Shahaadada Dugsiga Sare ee Waxbarashada sannadkan, shahaadadaasina waxay fududeynaysaa gelitaanka jaamacada, waxbarasho dheeraad ah iyo shaqo.

## **NAPLAN**

20 Maarso 2020, Wasiiradda Waxbarashada waxay go'aansadeed inuusan dhaceynin NAPLAN 2020. NAPLAN wuxuu qorshihiisu ahaa in la qabto laga bilaabo 12 ilaa 22 Maajo 2020.

Go'aanka ah inaanu dhicin NAPLAN 2020, waxaa loo qaatay si loo caawiyo hogaamiyayaasha dugsiga, macalimiinta iyo shaqaalaha teegarada si ay xoogga u saaraan fiyoobaanta ardeyda iyo inay waxbarashadu sii socoto.

NAPLAN waa qiimeynta qaran ee ku imtixaanta awooda ardeyda saddex meelood wax akhriska – akhrinta, qoraalka iyo luuqad bedelaada (higaada, naxwaha iyo calaamadaha) – iyo xisaabta. Dugsiyada dhammaan gobolada iyo territory ga waxay maamulayeen NAPLAN laga soo bilaabo Maajo 2008 sannad kasta.